# Soo koobida Deeqaha Sinaanta Carruurnimada Hore 2023

## Xaqiiqooyinka Degdega ah ee Wareega 2aad

- Codsiga Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore waxa uu furmay May 10, 2023 waxana la xidhay Jun 30, 2023. Codsiga iyo agabka waxa lagu turjumay lix luqadood.
- Codsiga deeqda waxaa la abuuray iyadoo lala kaashanayo kooxaha naqshadeynta oo ka kooban bixiyeyaasha iyado la isticmaalaya Naqshad khas u ah. Codsiga waxaa lagu sii kala saaray wareeggii labaad, iyadoo la adeegsanayo jawaab celin ka timid bixiyayaasha, ururada xulafada ah, wakiilada qabaa'ilka ee Dawladda, iyo daneeyayaasha kale.
- Miisaaniyada DCYF ee Wareega 2 waxay ahayd $3.4 milyan. 943 codsi ayaa la helay oo codsanaya in ka badan $47 milyan.
- DCYF waxay ku samaysay hubinta tayada dhammaan codsiyada. DCYF waxay meesha ka saartay codsiyo sababahan soo socda awgood: kuwo aan u qalmin, lacagihii loo codsaday ujeedooyinka la diiday, codsiyada aan dhamaystirnayn, iyo codsiyada maalgelinta ee ka baxsan xadka la ogol yahay.
- DCYF ka dib waxay u kala hormarisay codsiyada iyadoo loo eegayo qodobada mudnaanta leh ee la sameeyay iyadoo lala kaashanayo bixiyeyaasha oo si dheeraad ah loo sifeeyay iyadoo lagu salaynayo jawaab celinta la ururiyay kadib Wareegii 1
- Guddi dib u eegis bulshadeed ayaa dib u eegis ku sameeyay 90kii mashruuc ee ugu mudnaa. DCYF waxay ay isticmaashay buundooyinkooda si ay u doortaan codsiyada si ay u maalgeliyaan.
- Abaalmarinta wareega 2aad ee deeqaha waxay maalgelin doontaa 65 codsi, wadar ahaan $3.4 milyan: 12 ka socda Guryaha Qoyska ee shatiga leh, 49 ka socda Xarumaha Xannaanada Carruurta, 2 ka socota qandaraaslayaasha ECEAP, 1 ka socota Kooxda Ciyaarta iyo Waxbarshada, iyo 1 ka socota Qoyska, Saaxiibka, iyo Daryeelaha Deriska .

## Hordhac

Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore waxa ay caawisaa taageerada barnaamijyada dhaqan ahaan ka jawaabaya si ay carruurtu u helaan daryeel kala duwan oo buuxinaya baahidooda. Lacagta deeqda ah waa in loo istcimaalaa in lagu daro dhaqamo loo dhan yahay, dhaqan iyo afba taageero iyo dhaqamada khuseeya, ama labadaba qaabaynta barnaamijka waxbarashada hore, gaarsiinta, waxbarashada, tababarka, iyo/ama qiimaynta.

DCYF waxa ay furtay arjiga Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore May 10, 2023. Codsigu waxa uu bixiyayaasha wax ka waydiiyay carruurta ay u adeegaan barnaamijyadooda. Iyada oo qayb ka ah habka dib-u-habaynta, DCYF waxay heshay codsiyo badan si ay u siiso bixiyeyaasha hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan noocyada mashaariicda ee si fiican u isticmaalay maalgelinta deeqda. Natiijo ahaan, DCYF waxay waydiisatay bixiyeyaasha inay doortaan mid ka mid ah yoolalka soo socda mashruucooda: ka hortagga eryidda iyo cayrinta; kordhinta isticmaalka hab-dhaqannada waxbaridda shucuur-bulsheed ee cilmi-baadhiseed; kordhinta adeegsiga dhaqamada jawaab-celinta dhaqameed iyo luqad ahaan iyo hoos u dhigida eexda ee fasalka; bixinta qiimaynta ilmaha ee socota iyo baadhista korriinka; ama ku xidhida qoysaska adeega iyo taageerooyinka buuxiya caafimaadka, caafimaadka maskaxda, dhaqaalaha, ama baahiyaha kale. Bixiyeyaasha ayaa sidoo kale awooday in ay cadeeyaan hadafkooda. Ka dib markii ay doorteen yoolka, bixiyeyaasha ayaa sharaxay mashruuc ka caawin doona xaruntooda inay gaarto yoolkaas. Kadib waxay keeneen macluumaadka ku saabsan maalgelinta ay u baahan doonaan si ay u dhamaystiraan mashruucaas.

Muddadii codsiga, DCYF waxa ay heshay 943 codsi oo codsanaya in ka badan $47 milyan, taas oo ka badan $3.4 milyanka la heli karo.

## Kala saarida Codsiyada

Codsiyada Sinaanta Carruurnimada Hore waxay soo mareen tillaabooyin badan oo dib u eegis ah. Marka hore, codsiyada waxaa lagu eegay u qalmida iyo dhamaystirka, ka dib waxaa la kala horraysiiyay iyadoo lagu salaynayo qodobada hoos ku xusan, iydo kuwa soo haray la horgeeyay guddi dib u eegis ah si ay darajo u siiyaan.

### Baaritaanka codsiyada

DCYF waxay meesha ka saartay codsiyada aan dhamaystirnayn. Codsiyada bixiyeyaasha aan buuxin shuruudaha u-qalmitaanka, ama kuwa codsaday dhaqaale ujeedooyin la diiday, ayaa sidoo kale meesha laga saaray.

### Kala hormarinta

Kadib markii la baadhay codsiyada u-qalmitaanka iyo dhamaystirka, DCYF waxay mudnaan siisay codsiyada sida uu qabo DCYF waxay la shaqeysay bixiyayaasha iyo daneeyayaasha kale si ay u soo saaraan liiska soo socda ee mudnaanta dadweynaha deeqda:

• Xarumaha u adeega carruurta Madaw, Asaliga ah, ama Dadka Midabka leh (BIPOC)

• Xarumaha u adeega carruurta ku diiwaangashan ama u qalma xubinnimada mid ka mid ah qabaa'ilka dawladda dhexe ee Washington

• Xarumaha u adeega carruurta qaata kaalmada dawladda, qabiilka, ama milatariga

• Xarumaha u adeega carruurta ay haysato guri la'aan ama hooy la'aan

• Xarumaha u adeega carruurta ku jira daryeelka ka baxsan guriga sababtoo ah ku lug lahaanshaha

daryeelka ilmaha

• Xarumaha u adeega carruurta kaga hadasha afafka aan Ingiriisiga ahayn guriga

90 codsi oo haysta buundooyinka mudnaan sare leh marka loo eego nooca xaruntooda ayaa loo tixgaliyey inay yihiin kuwa u dambeeya.

### Dib u eegida Gudiga

DCYF waxay soo ururisay talooyinka dib u eegista guddiga la-talinta ee daneeyayaasha dibadda, iyo sidoo kale ka codsanaya mutadawiciinta kooxaha la-talinta DCYF iyo kooxaha kale ee daneeyayaasha. DCYF ayaa markaa qabatay guddi dib u eegis ka kooban u doodayaal, khubaro, iyo xubnaha bulshada si ay u qiimeeyaan codsiyada ugu dambeeya. Guddiga dib u eegista waxaa ku jiray wakiillo ka kala socday kooxo kala duwan, oo ay ku jiraan bixiyeyaasha, waalidiinta, iyo qabaa'ilka.

Guddigu waxay akhriyaan codsiyada u dambeeya, iyadoo dhammaan macluumaadka aqoonsiga laga saaray, iyago mid walba siiyey darajada 1-5. DCYF waxay ku dartay buundooyinka gudiga si ay u sameeyaan darajada ugu dambeysa.

## Go'aamada Maalgelinta

Maalgelinta waxaa lagu abaalmariyay tas-hiilaadka dhibcaha ugu sarreeya ee nooc kasta oo bixiye u qalma, iyadoo la isticmaalayo maalgelinta la heli karo. Guud ahaan, 65 mashruuc ayaa la maalgeliyey. Kuwaas waxaa ka mid ahaa: 61 mashruuc oo ka yimid shatilayaasha, shahaado ama shahaado bixiyayaasha lacag bixinta oo keliya (12 guri qoys oo shati leh, 49 xarumaha daryeelka carruurta); 1 mashruuc oo ka yimid qoyska, saaxiibka, iyo daryeelaha deriska; 2 mashruuc oo ka yimid qandaraaslayaasha ECEAP; iyo 1 mashruuc oo ka yimid Kooxda Ciyaar oo Baro.

Khariidaddani waxa ay tusaysaa goobaha xarumaha abaal-marinta:



## Talaabooyinka Xiga

DCYF waxa ay qorshaynaysaa in ay soo ururiso jawaab celinta bixiyayaasha ka hor inta aan la furin wareega xiga ee Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore. Waxaan filaynaa in wareegga xiga uu furmi doono hadhow 2024.